# Sillansugan

A. M. Yusuf | Wayeel@operamail.com

**Yusuf. C. Suusle ayaa yidhi:**

**Nin rahmaday walaalkii int'uu raashin ku amaahday**
**Risiqii ba'yoow wax'uu cunaa ribiyo laaluush'e**
**Ruqso malaha aakhira na waa u raran cadaabeed'e—**
***Nin ruwaayad loo dhigay int'uu run u malaynaayo***
**Rayiga iyo aqoontiisu waa ruux xidiidinah'e—**
**Reeryadiisa awr baa cuniyo raradii saarnayd'e**
**Raamsiga ma daynine laft'uu ruugayaa waliy'e**
***Ratigii madoob'aa* xal'uu haamihii riday'e ...**

SIYAASADDA DAGAALOOGAHA SOOMAALIYA, had iyo jeer, maanka dadka ay'ay u xadi karaysaa sidii hashii buktay ee loo geeyay, Ina Dheryodhoobo, nin ku xeeldheeraa cudurrada geela dhaca. Waxa la horkeenay tulud qabtay cudur ka yaabiyay ee uu si na u bixin kari waayay. Dabadeed kolk'uu dhinac kasta kala wareegay, ayuu *yahankii*[1] yidhi: "Hashu maank'ay gadday'e, ma masaar'ay laqday!" Ilaahay ayaa se *afkiisii* ku duway; wixii uu iska yiri ayaa ba ay runtii na ahayd! Hasha masaar ayaa la soo liqsiiyay.

WEYDIINTU MAANTA WAA: "*ratigii madoobe ahaa*" maank'uu gaday'e ma daabkii[2] masaarta ay'uu dhunjiyay? Ma Wasiirkii Gudaha ay'aa guddoonshay, Soomaaligii Muslim ah ba, in loo qafaalo dibaddaha, sheedda na loo dhigo—Xabsiga Ilaamtakoorka ee Guantanamo? Ma Wasiirkii Ganacsiga ay'aa dhiiggii wadaadda Ilaahay siistay iibsi lacageed? Ma Wasiirkii Arrimaha Diinta ayaa seyladaha kuffaarta "Suuradihii Quraanka" ku doorsaday wax aan dooc na tari doonin? Ma Wasiirkii Dhaqancelinta ayaa dhaqankii qaranka dhalanrogay? Ereyaga "wasiir" ku ma tilmaameen raxan "yey[3]" ah; waa se magac ay siiyeen reero luuggooyo—qaranka Soomaaliyeed, iyaga oo kale, si na u ma doorteen. Waa lagu hungoobay. Nimankan iyada oo aan la qaawin dharka ha laga dhigo. Duulka dharkooda iyo dhogortooda *sawirro foolxun* ha laga baaro. Guryahooda na ha la soo sahmiyo. Waa wax aan iska oranayo, dhab ahaantii se, run noqon karo.

SI DOWLADDII MBAGATHI galbeedka ay kalsooni uga hesho ay'ay carr'oo dhan marisay in saraakiishii dilkii Xamar lagu dilay—basaasiin uu qudhoodu shisheeyuhu ku gabraaran jiray—ay

gaysteen argagexiso ku jaal ah ururka Al-Qaacida, loo na baahan yahay in dalka laga xaaqo. Siro qarsoodi ahaa ayaa soo mudh yiri; waxa soo ifbaxday in Cabdullaahi Yuusuf iyo qawlaysato ku jaal ah in ay isla iyagu, ahaayeen: "kuwa nabarrada gaysta ee misane dadka kale na ku naba oo Nebigii na (scw) uga hormara,"—si ay ugu gorgortamaan hiil na ugu helaan dabargoynta aragagexisada. Mohamed Salaad Tafey—ku dhashay Itoobiya, saraakaal Xabashi ah—uu walaalkiis na xubin ka yahay dowladda Itoobiya, ayaa falalkaas ka dambeeyay. Tafey hore ayuu u afduubay gaag reer Oromo ahaa. Waxa isla qaraabta isaga iyo Cabdi Waal—beesha Cayr.[4]

> "Diyaaradaha basaaska ee Soomaaliya dul haadaya, afduubka loo geysanayo dad aan wax ba gaysan oo loo saarinayo in ay argagexiso xiriir la leeyihin, la shaqaynta hogaamiye kooxeedka dhamaan talaabooyinkaas waa kuwo kalsooni daro ka kasbanaya bulshada," ayey qeexday warbixintii ururka International Crisis Group (ICG).

## Sillansugan

ERAYGA SILLANSUGAN WELIGAA maankaaga ku sido. Haddii aad hadli lahayd, haddii aad gabyi lahayd, iyo haddii aad wax qori lahayd, tood ba. Sillansugantu waa furaha maansada oo idil. Kulan Xasan waxa uu ka mid yahay qaar ka mid ah gabyaaga Soomaalida ee gartay jiritaanka yaabisada sillansuganta. Gabay na gabay ma aha, haddii uu ku saabsan yahay sillan ama sugan, midkoodba. Laba da waa in uu israacshaa kala na reebin. Sillantu iyo sugantu waa cududdo ka mid ah maansada. Sidaas awgeed na, sillansugantu waa xoogga cududaha ku jira. Madaama aan "*cudud*" oo kale wax ku tilmaamay, ay'aan adeegsaday ereyga "xoog"; ogow se, xooggaas in uu u dhigmo baaqa la doonahayo in dareenka kiciyaha[5]—akhriyaha—lagu kiciyo. Geddii cidhifyadii kala geddisan ee birlabta waa in sillansugantu u soo jiidaa maanka.

KULAN XASAN CILMI (Afjurun) ayaa diray halxiraalaha hoose:

> Cirkoo guuri ciidd'oo god geli dhagaxyad'oo goohi
> Qorraxd'oo xanuun laga gub'oo garab ka taahaysa
> Biyah'oo harraad gubahay'oo gal u arooraaya.
> Gú nin jira graaad na aan yareyn ee garku caddaaday
> Gud iyo yicib galool iyo maraa geedo tiro gaaray
> Ee aan samada guudkeeda jirin ciiddana aan gaarin
> Gammaankii fardood ee dammeer ganac ka hooseeya
> Naagah'oo gar naqi iyo ragg'oo guudka xiranaaya
> Geerid'oon wax dilin oo ninkii go'ay u booyaysa …

MAANSADA KORE EE Kulan Xasan gabyaa—ninsamood diinta Islaamka ku wanaagsan—ay'uu ahaan jiray. Bal in cabbaar ah



Printed On: GPL Ghostscript Colorlayer: ? Document Page: 2
**Email**: **wayeel@operamail.com** | **Curiye**: **A. M. Yusuf** | Ladh: Sillansuga
**Ereyo**: 1901 | **Bog**: 2 **ka** 7 | **Garaacay**: 02/21/06 10:02 PM

maanka ku sii rogrog. Haddii aad, Kolley se, weli leedahay isla dhaqankii uu Afjurun ku noolaan jiray oo kale, waxa laga yaabaa in taasi kugu kaalmayso si ay fiiradaadu u hufnaato. Maanta w'ay ku la dhib badnaan kartaa; beri waxa se iman aad oran doonto: "O ooo! Ma sid'aas ay'aan wax u garan waayi jiray!" Laga yaabee in ay kuu fududaato si aad ku garato; laga na yaabee in ay kugu cuslaato si aad u furtid xalxiraalahaas furan. Car waa ku kaas ee garo: tixaheer isburinaya, isbeeninaya, hardamaya ee sillan oo hadda na sugan. Gabay laga unkay oggol iyo diiddan, sidii labada garab ee dowladdii Mbagathi, ee uu gabyaagu isugu sarjaray geddii xarig laga soohay "ha" iyo "maya"—tabane iyo togane. Ujeeddada sillasugantu waxa ay ku negi tahay meel dhextaal ah—"Meel aan samada guudkeeda jirin ciidda na aan gaarin!" Halkaas aan iftiin kuugu dhifto. "Iyo" ama se "na"[6] ayaa u dhigmo dhextaalka, isaga ah! Aan bal in yar yaabka kuu fero—kuu jilciyo.

DIILINTA UGU HORREYSA ee maansada Kulan Xasan, t.a "*ciidd'oo god geli*", godka laga hadlahayo waa sida aad u garatay; godku waa "irridaha xabaasha[7]" kuwaas oo maydka lagu arooriyo. Ciidda dhimanaysa ee xabaasha lagu adkaynayaa, maxay tahay se? Ma 'ciid' baa dhimato? Ogow dad Aadam (cs) ayaa ugu horreeyay qof uu Rabbigu uumo. Eebbe carro ayuu Aadam ka uumay. Dadku Aadam buu ka yimi; Aadam na carro ayuu ka yimid. Dadkii duudkoodii hore laga beeray ciidda—ilmihii Nebi Aadam—kolka ay geeriyoodaan waa isla *ciiddii* (dadkii) oo *ciiddii* (iilka) laga hoosmarinayo oo kale. Subxaana Allaah! Wa'llaahu Akbar!

## Wayaragnimo

"WAYEEL TALO MA seegto; tabco na ma illoobo," ay'ay oran jirtay islaan ayeeyo ahayd. "Si kasta oo indho iyo dhego ba laga saabo, *cillanaad* iyo *caadyaal*, labadu ba in ay yihiin wax jira, w'uu kaa og yahay."

Carruurnimaddii, ay'ay dhal baas igu hodeen qori loo yaqaan dabdacalle. Qorigaas waa qori; hadda na waa qori ah, si goonni ah. Aniga oo aan ogayn waxa uu hoosta ku watay ay'aan soo qabtay. "Dab nin haya, daa' la ma yiraahdo. "Xa'h, ma gacmihii ay'uu i gubay! Qorigu dhan cillan, dahsoon iyo waxa uu ka kooban yahay dhan caadyaal, muuqda. Kulaylku iyo qabowgu waxa ay ku kulansan yihiin waa isla halkii shay! Wacdarahan oo kale: laba walxood oo kala gedisan ee isla hadda na meel qura ku wada ayiman; afka maldahan ee suugaanta Soomaalida waxa loo yaqaan sillansugan. Sillansugantu waa oraahyo ka kooban hawraarro isdiidaya ama isbeeninaya, asii isla hadda na, si uun ay wax run uga yihiin. Tusaale ahaan, *Soomaalidu waa gacal isneceb*! Ma gacal ayaa gacal fogeeya?



Printed On: GPL Ghostscript Colorlayer: ? Document Page: 3
**Email**: **wayeel@operamail.com** | **Curiye**: **A. M. Yusuf** | Ladh: Sillansuga
**Ereyo**: 1901 | **Bog**: 3 **ka** 7 | **Garaacay**: 02/21/06 10:02 PM

Ogi, in'aad su'aashaas oo kale i weydiin lahayd! Weydiintan kama afcelinayo, maanta. Bal se aan u laabto, daaha na ka rogo ereyga tibaaxda mudan.

DABDACALLE: waa degel docda hoose ka qiiqaabaya, dusha sare na ka ah dogob dansan. Afka sidaas wacdaraha u qeexi og iyo ereyga loo bixiyay, gebi ahaan, awowgay ay'aan ka bartay.

MAANMAALKU WAXA UU adeegsiga bidaa muuqaallo kaas oo kale la halmaala; si waxyaabo aan naga dahsoonayn uu daaha uga qaado. Si ka dhigan: "Nin anbaday halk'uu aaday w'ay ula ekoonayd'e / Anig'oo arkaay'aan waddada eerig'oo maray'e!"[8] Indhaha oo shanta ah, "harka galay kolkay tahay ay'aan hilinka daawga ah aanu kala habownaa[9]"—oo jidkii ba arkimayno—mararka qaarkood. Aqoonta aan ay xigmaddu garhayn, waa sida qof indhoole ah oo la dhex taagay meel iftiin iyo dhalaal badan. Dadka qaar weli ba indhoole ah ayaa ba arki og—waa run jirta—waxyaabo ileysku uu innaga nagu indhosarcaado. Ii sheeg walaal, hadde, 'yaa indhoole ah?

MA AQOONYAHANKA SOOMAALIYA ayaa cammool indho xiran ah? Ma shacabka Soomaaliya ayaa wada indhobeelay? Maya, sidaas ma aha: Soomaali indhohooda qabta iyo kuwo aan indho qabin ba, labadu ba, dad waxa jiray ka dhiidhiyay "**4.5**". In tulud aan ay tumbul hogaamin karayn; in aan uu qabiilku qaran u dhigmi kareyn—cid dheg amaahisay na ma jirin. Guuldarridaas awgeed, ay'ay beelihii reer Soomaaliya u dirsadeen garoonkii Mbagathi kooxo aan xeerarka ciyaarta ba loo tababarin? Kooxo in ay ciyaartooyda jebiyaan mooyee aan wax kale oqoon; ciyaarta na lugaha ku qasa oo aan taakada iyo heeto qof na uga tureyn—feerku na waa ka soo horreeyaa! Garsoore (siiriwalihii, arbitro) mar waa Amxaar, mar waa Afyuub, mar na Dalxiin-Dalxiin[10]. Kooxo laba sano iyo dheeraad aan weli hal yool ah oo ay dhaliyeen sheekada lagu hayn. Hadda waxa ay u soo dhigteen in ay dilaan dadkii durbannada u tumayay ee hiilka u la joogay meel walba. Shacabka Soomaaliya waa sida isha miiskiinta ah oo kale—"qodaxdii mudi lahayd ma arkaan". Haddii se ay ili wax qabanayso, Ilaahayow isha shacakaas saboolka ka soo saar oogada dagaalooge. Eebbow ajiib, aamiin na iri!

DIGTOONOW! Dabdacallaha sida uu uurka hoose iyo oogada sare uga kala duwan yahay; dad na, waxa ku jira mid guudka gacal aad mooddo, gunta hoose ee wadnaha ka ah gaal ku nacayb—waa munaafaq.

WELIGAA MA ISWEYDIISAY SIDA ay ku suurtagashay dadyow kumanyaal laguug tiro ka sii badan, in ay ku hoos saxariiraan talada hal nin, kaas oo ku kadeeda, mid aan ka ahayn mooyee isla awooddii—markeedii hore ba—ay iyagu isaga ku yabooheen? Waxa



Printed On: GPL Ghostscript Colorlayer: ? Document Page: 4
**Email**: **wayeel@operamail.com** | **Curiye**: **A. M. Yusuf** | Ladh: Sillansuga
**Ereyo**: 1901 | **Bog**: 4 **ka** 7 | **Garaacay**: 02/21/06 10:02 PM

uu waxyeello u geystaa ba, waa inta ay iyagu u sii dulqaadan kari doonaan; ma na uu awoodi kari doono in uu iyaga sii kado: haddii ay doortaan, halkii ay "ku oggolin" ka oran jireen, in ay "ku diidnay" ka yiraahdaan.[11]. Soomaalidu waa in ay dagaalooge "nacam" yiraahdaan, Naaru Jahanam na ay ku hoobtaan; iyo waa in ay Amarka Allah "nacam" yiraahdaan oo adduunka naallo ku waaraan, aakhiro na Jannadii galaan.

TAAS NA HUB u ma baahna. Dagaalooge waa jaahilkii la sheegay! Ka fogow agtiisa. Wax na ha ku darsan: Isaga ay'ay xidaddadu ka engegi doonaan; dabeed na shidaal u noqon doona Naartii Jahannama—Maalinka Qiyaamaha. Ilaahayow na qof Muslim ah ku ridin. Xigmad anig'oo yar Al Ustaad Kindi, macallinkaygii afka Carabiga, uu iigu qoray daftar aan weli haysto, ay'aan soo xusuustay hadda. Haddii aan af Soomaali u celiyo na noqonaysa sidaan hoose:

> Cilmigu waxa uu dhisaa guryo aan tiir hayaa jirin
> Jahligu na waxa uu dumiyaa guryihii cisiga iyo sharafka.

**"Miy'ay siman yihiin kuwa wax yaqaan iyo kuwa aan wax ba oqoon."**

> Guddidiyo gargeydhiyo' ardada soo gar niqi weydey
> Afarta goonnidaaq iyo kuwaa guraya laaluushka
> Kiishyada garkaa marahayiyo lacagta guuraysa
> Adigaan gacmaha kuu wadhay oo hoosta kaa galay'e
> Allahayow cuquubaday gasbaan haygu gelinsiinin
> Oo haygu gubin waa adduun gees u foorara'e!
>
> — Ismaaciil Mire, "*Adduun Gees u Foorara*".

## Aamiin!

F.G. Islaanimadii ba in la sheegto wax laga baqo ay'ay noqotay. Aayad Qur'aanka Kariimka ah ama siiraddii Nebi Maxamed (scw) haddii lagu soo qoro shabakadaha interneetka Soomaalida qaarkood, waxa aad mooddaa in si goonni ah loogu dadbayo walaalkii soo qoray; sitaahoo Quraankii yahay mid isaga uun loo soo dejiyay. Ama ba shaki la gelinayo akhriyihii: "**Maqaalkani w'xuu ka turjumahayaa fikradda Qoraaga loo mana qaadan karo midda Wadnaweyne.com**"—malaha in lagu qabsado ay'ay ka baqahayaan! Meeday madaxbannaanidii hadalka? Quraanka waa Dastuur Rabbaani ah. Haddii Islaamimadiinu ay sidaas u liidato, waayo aad u soo bandhigteen, markeedii hore. Ogaada, waxa la isu haysto waa kuwii caayda Rassuulkii Maxamed ahaa (scw) faafiyay. Wixii qoraaga loo raacan lahaa, adiga na waa laguu soo raacan doonaa. Muslimkii iyaga ay'aan isu dirganayn, sida la arko! Arag oo maqal, waxa gaalku yiraahdo oo adigu na "niiq" ha oran! Ceebtaas ha la iska dhaqaqo, haddii aan walaalo nahay—weli ba na Islaam aan wada nahay.

- .

Dhamaad



Printed On: GPL Ghostscript Colorlayer: ? Document Page: 5
**Email**: **wayeel@operamail.com** | **Curiye**: **A. M. Yusuf** | Ladh: Sillansuga
**Ereyo**: 1901 | **Bog**: 5 **ka** 7 | **Garaacay**: 02/21/06 10:02 PM

[1] **yahan**: waa erey Soomaali ah. Anigu se waxa aan la meel dhigaa ereyga qalaad ee "expert".
"Masaarey sid'aad ii jarayso ii ma aadan jarteen, had'aan gabakay kugu daabnayn" ay'uu yidhi geedka gacaltooyo oo ay Soomaalidu ugu maahmaahdo.

[3] Waa erey aflagaaddo ee uu adeegsaday Maxamed Siyaad Barre: USC oo isaga Xamarcadde ka eryootay, ayuu ku tilmaamay in ay ahayd oo kale — yey. Isha ayuu na ka riday—wixii uu iska yiri ayaa ba ay runtii na noqotay.

[4] International Crisis Group, " *Dirty conflict*", 11-07-05. Eeg Qeybta: Dagaal Wasaqaysan.

[5] "Ii akhri waraaqda gaalku ii soo diray," ay'uu qawlaygii ku yiri wiil hubaysan ee isaga ag taagnaa. "Igu Wall'oonan far oo dhan ba kicin oqoon," ay'uu mooryaankii na ugu afceliyay dagaaloogihii!

[6] Ereyga "**na**" waa xiriiriye u dhigmo ereya "**iyo**." t.a Geedo aan samada guudkeeda **iyo** geedo aan ciidda gaadhin.

[7] Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi), "Arag Maqal". Hees aad mooddo dabuubteedu in ay ku xoonsan tahay diilimaha ugu dambeeya:

Dadku yuu ku eedayn
Ha dhex gelin ammuuraha
Isha xidho afkana dhawr
Arag maqal warkana ood

Shan iyo toban sano ay'uu shacabku iska shibbanaa; haatan na weli iska shibban yahay.

[8] Axmed Dirir Nuur Aadan, "*Eerigoo*". Eeg halkaan ...
[9] Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi), "*Halkay Caawa Joogtaa*". Hees uu qaadi jiray Maxamed Mooge Liiban.
[10] Beel koofurta Soomaaliya degta ayaa beri ku shiribtay:



Printed On: GPL Ghostscript Colorlayer: ? Document Page: 6
**Email**: **wayeel@operamail.com** | **Curiye**: **A. M. Yusuf** | Ladh: Sillansuga
**Ereyo**: 1901 | **Bog**: 6 **ka** 7 | **Garaacay**: 02/21/06 10:02 PM

Dalxiin-Dalxiin a'mmaan dilaa
Dariiq walb'aw dukaan dhigee.

Dalxiin oo ka dhigan: (thal xiin= hathal xiin)= goortan la joogo.

[11] Etienne de la Boetie, "*The Politics of Obedience: The Discourse of Voluntary Servitude*" .

_________________________________

**AFEEF: ARAGTIDA MAQAALKAN WAXAA LEH QORAAGA KU SAXIIAN**

**Faafin: www.SomaliTalk.com | Feb 22, 2006**



Printed On: GPL Ghostscript Colorlayer: ? Document Page: 7
**Email**: **wayeel@operamail.com** | **Curiye**: **A. M. Yusuf** | Ladh: Sillansuga
**Ereyo**: 1901 | **Bog**: 7 **ka** 7 | **Garaacay**: 02/21/06 10:02 PM